
WAXAAN
BARTAY
RABBIGAY
Safar ku saabsan barashada Alle,
naxariistiisa, awooddiisa
iyo hanuunkiisa.
QORAAGA
HODO YUSUF CABDI

AFEEF 4

Hibayn 5

Mahadnaq 6

Hordhaca buuga 8

Cutubka 1'aad 12

Sifaadka iyo waynida alleh 12

Cuttubka 2'aad 17

Mucjisnimada Qur'aanka Kariimka ah 17

Cuttubka 3'aad 28

Dembidhaafka (tawbada) 28

Cuttubka 4'aad 34

Jacaylka rabi ayaan bartay 34

Cuttubka 5,aad 40

Naxariita rabi ayaan bartay 40

Cuttubka 6'aad 45

Ku kaaftoomida quranka 45

Aayaadki saamaynta igu yeeshay 52

AFEEF

Sida lawada oog soon yahay qofkaste oo wax qabta ama hawl cusub bilaaba wuu gefaa , oo ma nihin kuwo dhamays tiran waayo alleh oo qudha ayay u sugnaatay dhamaystirnaantu.

Hadaba wixii khalada ama dhinnaansho ah ama laxni ah ee aad ku aragtaan buugan , maaha mid kas ah ee waan cudur daaranayaa , waxaan diyaar u ahay wixii sixitaan ah.

Ilaahayaw waxaan ka baryayaa hadi aan eex galay in uuiga cafiyo , aqoon darona aamu igu cadaabin

Hibayn

Waxaan buuggan u hibaynayaa qof kasta oo qalbigiisu u hiloobay inuu barto Rabbigiisa; inuu garto Weynidiisa, awooddiisa aan xadidnayn, xigmaddiisa, dulqaadkiisa, naxariistiisa baaxadda leh iyo jacaylka uu u qabo addoomihiisa.

qof kasta oo doonaya inuu Rabbigiisa ku caabudo cilmi, jacayl iyo yaqiin, kana gudbo cibaadada caadada uun ku dhisan una tallaabo cibaado uu qalbigiisu ku nool yahay.

Waxaan u hibaynayaa kuwa qalbigoodu raadinayo hanuun, degganaansho iyo iftiin; kuwa fahmay in farxadda dhabta ahi aanay ku jirin waxyaabaha adduunka lagu ursado, balse ay ku jirto aqoonta Rabbiga, u dhowaanshihiisa iyo ku kalsoonaanta

Buuggani waa socdaal kuu horseedaya inaad magacyadiisa iyo sifooyinkiisa ku barato, si qalbigaagu u sii jeclaado, iimaankaaguna u sii xoogaysto.

Sido kale waxaan u hibaynayaa buuggan qof kasta oo qalbigiisu la daala dhacayo degganaansho la’aan; qofka ay hareereeyeen hirarka werwerka, mawjadaha qoomamada iyo madhnaanta ruuxiga ah; qofka dareemaya inuu lumay, isaga oo weli ku socda jidka nolosha, balse qalbigiisu baadi-goob ugu jiro hanuun

kuwa aan weli lumin rajada, ee rumaysan in maalin uun ay gaadhi doonaan xorriyad dhab ah, xasillooni waarta iyo raalli ahaanshaha Alle; kuwa qalbiyadoodu u hamuun qabaan toobad daacad ah iyo nolol saldhiggeedu yahay iimaan, yaqiin iyo talo-saarasho buuxda oo Eebbe lagu qabo.

Mahadnaq

Marka hore, mahad iyo ammaan aan dhammaad lahayn waxaa iska leh Allaha qorsheeya arimaha insaanka kaas oo ii fududeeyey dhamaystirka shaqadan, iguna mannaystay caafimaad, awood, sabir iyo fursad aan ku gaadho heerkan. Haddii aanu Alle i waafajin lahayn, suurtagal ma ahaan lahayn in shaqadani ay sidaan ku hirgasho.

Waxaan mahadnaq iyo qaddarin gaar ah u jeedinayaa waalidkayga qaaliga ah, kuwaas oo had iyo jeer ii ahaa tiirka aan ku tiirsado. Jacaylkooda, ducooyinkooda, daryeelkooda iyo dhiirrigelintoodu waxay ahaayeen sababaha ugu waaweyn ee ii horseeday guul kasta oo aan gaadho. Erayo laguma soo koobi karo wanaagga iyo naf-hurnimada ay ii sameeyeen. Ilaahay ha ka abaalmariyo abaalgudka ugu wanaagsan, hana ka dhigo kuwo ku naalooda caafimaad, barako iyo farxad.

Sidoo kale, waxaan mahadnaq wayn u gudbinayaa macallimiintaydii sharafta lahaa ee uu ugu horeeyo sheekhaygi na baray tafsiirka

mohamed sh dirir iyo mushrifadaydi Rahma suldaan ee aqoonta iyo akhlaaqda lahaa. Waxay si hagar la’aan ah noogu bixiyeen waqtigooda, cilmigooda iyo dadaalkooda. Waxay noo noqdeen hageyaal noo iftiimiyey jidka aqoonta, kuna beeray qalbiyadeenna jacaylka waxbarashada diinta iyo raadinta cilmiga., Ilaahay ha ka dhigo cilmigooda mid anfaca adduun iyo aakhiraba.

Waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa dhammaan ardaydii aan safarka waxbarashada wadaagnay. Waxaan isla soo marnay maalmo dadaal, sabir iyo himilooyin waaweyn leh ,. Wadajirka, is-garab istaagga iyo dhiirrigelinta aan isweydaarsannay waxay qayb weyn ka qaateen fududaynta safarkan. Xusuusta maalmahaas qiimaha badan waxay weligeed ku sii jiri doontaa qalbigayga.

Ugu dambayn, waxaan mahadnaq u jeedinayaa qof kasta oo si toos ah ama si dadban uga qayb qaatay waxbarashadayda iyo horumarkayga. Kuwa igu taageeray talo, duco, dhiirrigelin ama garab istaag, dhammaantiin waxaan idiinka rajaynayaa khayr iyo barako. Ilaahay ha idinka abaalmariyo wanaagga aad ii muujiseen, hana idin waafajiyo guul iyo farxad joogto ah.

Hordhaca buuga

Buuggan aan ugu magac daray "***Waxaan Bartay Rabbigay"*** ma aha buug aan ku sheegayo aqoon gaar ah ama darajo cilmiyeed,oo aan gaadhay balse waa la wadaagid khibrad nololeed iyo Tijaabo fahamka iimaan ee aan ka helay 30 juzz , oo an bartay tafsiirkooda iyo waxay ka hadlayaan.

Hadii aan ka hadlo xaaladayda kahor bilaabida tafsiirka , Waxa aan ahaa qof mudo aad u dheer akhrin jiray Qur'aanka , waan xafidin jiray qaybo ama aayado ka mid ah quraanka balse si dhab ah uma fahmi jirin farriinta uu xambaarsan yahay iyo dulucda ayaadaha rabi

Kahor barashada tafsiirka Qur'aanka Kariimka ah, wuxuu ii ahaa kitaab aan akhriyo oo keliya, oo aan ka ilaaliyo buska misana dhunkado , Waxa aan ku dadaali jiray akhrintiisa, iyo in aan ku khushuuco oo ku raaxaysto codka quruxda badan ee imaamka iyo qaariga akhrinaya quraankan, hase yeeshee noloshayda maalinlaha ah wax saamayn ah oo muuqata kuma yeelan jirin.

Waxaan marar badan naftayda weydiin jiray: maxay aayadahani ii sheegayaan aniga?

Sideen ugu dabaqi karaa nolosheyda rabigayna ugu dhawaada ? Su'aalahan qalbigeyga ku jiray waxay ii noqdeen albaab furmay, oo igu riixay inaan bilaabo barashada tafsiirka.

Xaalad ahaan , waxaan ahaa qof noloshiisu aanay qorshe lahayn ,Maalmaha , bilaha iyo sanaduhu waxay ahaayeen kuwo is daba socda oo iskuwada mid ah oo kala daadsan ; ujeeddo la'aan, qorshe la'aan, iyo jihayn la'aan. Qalbigu wuu jiray, balse deggenaan ma lahayn, fikirkeyguna mar walba wuxuu ahaa mid wareersan

Waxaa jiray waqtiyo aan shaki galin jiray naftayda, xiliyo aan is waydiin jiray qiimahayga iyo sababta aan u abuuranahay, waxaan soo maray marxalado aad u qalafsanaa, marxaladahaas ugu danbayn waxay igu rideen halkii ay naftu ku xasilaysay.

Inkasta oo aan ahay qof muslim ah , haddana xiriirka iyo cilaaqada Rabbigay igala dhaxaysa ma ahayn mid joogto ah oo miyir leh. Ama wax damcad ah iimay lahaan jirin Cibaadada, . Qur'aanka waan akhrin jiray, balse uma akhrin jirin si aan u fahmo ama aan nolosheyda ugu hago. Wuxuu ii ahaa kitaab barako leh, balse aanan ka dhigan hanuun aan ku socdo oo ihaga

Marar badan ayaan dareemi jiray faaruqnaan gudaha ah, anigo wax walba haysto. Waxaan isweydiin jiray sababta qalbigeygu u deggenaan la'yahay, iyo waxa ka maqan nolosheyda. Su'aalahan aamuska ah ayaa igu kalifay inaan dib u fiiriyo naftayda, una jeesto meel aanan hore u eegin.

Marwalba waxaan ku ducaysan jiray in alleh ifahansiiyo kitaabkisa iyo risaalada caalamiga ah

Alleh ayaa mahad iska leh ii aqbalay ducadaydi anigo ah insaan daciifa oo danbaaba igana dhigay mid ku dhaw kitaabkiisa

Markii aan fadhiistay duruus tafsiir ah, ama aan akhriyay kitaabo tafsiir, ayaan dareemay in Qur'aanku ii la hadlayo si toos ah. Aayad kastana waxay xambaar santahay farriimo nololeed, oo kala gedisan sida Naxariis rabi, digniin, ama bishaaro. Halkaas ayuu iiga bilaabay safar ruxiyeed oo iiman ku dhisan waxan go'aansaday inaan si dhab ah u barto Rabbigay, anigoo ka baranaya sifaadkisa, naxariistiisa, dulqaadkiisa , deeqdiisa waynidiisa iyo sida uu addoomadiisa ugu hagayo jidka toosan

Intaa kadib waxaan dareemay in si tartiib tartiib ah uu isbeddel ku yimid qalbigayga, fikirkeyga, iyo sida aan nolosha u arkayo ee aan u waajahayo.

Tafsiirku wuxuu ii noqday furihii aan ku fahmay Rabbigay; naxariistiisa, caddaaladdiisa, xigmaddiisa, iyo sida uu Alle (SWT) addoomadiisa ugu hanuuninayo Qur'aanka dhexdiisa. Waxaan bartay in Qur'aankuin uusan ahayn kitaab keliya oo la akhriyo, balse uu yahay hanuun lagu noolaado iyo cibaado rabi oo daa'im ah

Buuggan waxaan ku soo bandhigayaa aayado iyo maawduucyo an fahan qaldan ka haystay oo saamayn igu yeeshay, anigoo la wadaagaya dadka casharradii aan ka bartay iyo sida ay u beddeleen akhlaaqdayda, hab fikirkayga, cibaadadayda, iyo xiriirka Rabbigay aan la leeyahay

Iyo sido kale mawduucyo iyo sheekoyinkii sida gaar ka ah isoo jiitay ee aan ka bartay tafsirka

Ujeeddadaydu waa in akhristuhu uu dareemo in Qur'aanku weli yahay mid nool, oo la hadlaya qalbiga qof kasta oo u furfurnaada eebe hadalkiisa

Waxaan rajaynayaa in buuggan uu noqdo mid dhiirigaliya oo anfaca qof kasta oo doonaya inuu si hufan u fahmo Qur'aanka, uguna dhowaado Rabbigiis, xitaa haddii uu isagu dareemayo in uu yahay mid aqoontisu yartahy

Ilaahay waxaan ka baryayaa inuu iga aqbalo camalkan, una ka dhigo mid daacad u ah dartiis, kana dhigo mid anfaca uleh aniga iyo qof kasta oo akhriya

Bilowgaasi ma ahayn mid sahlan, balse wuxuu noqday tallaabadii ugu muhiimsaneyd ee nolosheyda beddeshay.

Cutubka 1’aad

Sifaadka iyo waynida alleh

Magacyada iyo tilmaamaha alleh waa kuwo isaga ugooniya oo aanay jirin cid la masaal ah

Quraanka iyo axdiista rasuulka NNKH waxa lagu so weriyay qaybo aad u badan oo ah magacyada iyo sifaatka alleh ugaarka aah.

“Qofka bani aadmaka qalbigiisu ma helo xasillooni dhab ah ilaa uu garto cidda uu caabudayo, awoodiisa iyo astaamihiisa iyo wuxu qaban karo.

Waxaa jira waqtiyo nolosha insaanka ka mid ah oo qalbiga insaanku aamuso, afkuna uu juuqda gabo. Ma aha murugo darteed, mana aha farxad uu qofku xamili kari waayay. Waa waqti uu qalbigu la ashqaraarayo marka uu indho iiimaan leh ku eego wax yar oo ka mid ah makhluuqaadka iyo awooda rabbi swt..

Waxa laga yaaba in aynu baranay culuum fara badan, sidoo kalena aynu akhrinay kutub kala duwan, waxaa laga yaaba in aynu dhegaysanay muxaadarooyin iyo dooddo aqooneed. Mid kastaa wuxuu maskaxdeena ku kordhiyey xog iyo faham dheeraad ah . Laakiin waxaa jirata aqoon ka duwan aqoon kasta oo aan hore u baranay waa aqoonta lagu garto Alle waynidiisa iyo sifaadkiisa

Alleh wuxu kitaabkisa quraanka ku idhi.

ۖلَيْسَ كَمِثْلِهِ شَيْءٌ ۖوَهُوَ السَّمِيعُ الْبَصِيرُ

Ma jirto rabbi cid lamid ah oo kale alle wa maqal badane arag badan.

Maalintii aan bilaabay inaan si hufan u milicsado magacyada iyo sifaatka Alle, waxaan dareemay in qalbigaygu u guurayo adduun kale. Adduun aan ereyo lagu sifayn karin. Waxaan ogaaday in aan Rabbigay ka aqoon yaraa inta aan is lahaa waad ka taqaannaa.

Sidee qalbigu uusan isu bedeli. marka uu ogaado inuu jiro Rabbi maqla cod kasta, xataa codka aan afku ku dhawaaqin? Sidee baanay indhuhu ilmo aanay u qubin marka uu ogaado inuu jiro Rabbi arka ilmo kasta oo qarsoon, ogna xanuun kasta oo ka danbeeya ilmadaasi

Waxaan is weydiiyey: Sidee ayaan sannado badan u noolaa anigoo mararka qaar ka fikiraya makhluuqaadka, laakiin aan waqti badan u hurin inaan ku barto oo ka fekero Abuurahooda?

Markii aan ogaaday in Alle yahay Kan ugu Horreeya oo aan waxba ka horrayn, Kan ugu Dambeeya oo aan waxba ka dambayn, Kan Sareeya ee aan waxba ka korreyn, iyo Kan ugu Dhow oo aan cidiba ka dhaweyn , qalbigaygu wuxuu dareemay wax aanan hore u dareemin.

Waxaan arkay in dhibaatooyinkii aan buuraha u arkayey ay isu beddeleen wax aad u yar, sababtoo ah Rabbiga aan baryayaa waa Kan leh samooyinka iyo dhulka. Waxaan ogaaday in rajo kasta oo iga go'day ay dib u soo noolaan karto, waayo waxaan leeyahay Rabbi marka uu wax doono ku yidhaahda: "Noqo," markaana noqdaa.

Qofka garta Alle, adduunku indhihiisa wuu ku yaraadaa. Dadka uu ka baqi jiray way ku yaraadaan. Dhibaatooyinkii culayska ku hayey way fududaadaan. Sababtoo ah qalbigiisu wuxuu ku xidhmay Kan aan waxba ku adkaan ee wax kastaana ay u sahlan yihiin

La ashqaraaridda sifaatka Alle ma aha dareen soo mara qofka hal mar oo keliya. Waa safar cimri oo dhan socda. Mar kasta oo aad barato magac ka mid ah magacyadiisa ama sifo ka mid ah sifaatkiisa, waxaad dareemaysaa in aad mar kale bilowday garashadii Rabbigaaga.

Waxaa laga yaabaa in tani ay tahay sababta ay culimadu u yidhaahdeen: Qofka ugu aqoonta badan Alle waa kan ugu khushuuca badan, ugu jacaylka badan, uguna cabsida badan. Waayo garashadu ma dhaliso kibir; waxay dhalisaa sujuud , iyo hogaan sanaan

Cutubkan ma aha mid ka hadlaya aqoon keliya. Waa casuumaad qalbiga loogu yeedhayo inuu milicsado. Waa socdaal lagu ogaanayo in magac kasta oo Alle leeyahay uu yahay albaab kuu furaya jacayl cusub, iimaan cusub, iyo nolol cusub.

Bal ila eeg sida ay u quruxbadan yihiin magacyadiisa iyo tilmaamihiisa

Markaan alleh u dhawaaqayno waxa aynu ugu yeedhnaa magacyadiisa wanaaga badan marka aynu nidhaahno

Yaa Allahu yaa raxiim , yaaraxmaan ,ya wahaab , yaa casiis , yaa maaliku ya kariim ya waduud ilaa iyo dhamaadka kadibna aad xusto tilmaamihiisa iyo wax yaabaha uu abuuray ee aad tidhaahdo,

Ilaahayaw adaa insaanka abuurtay , ilaahayaw ada cir iyo dhul iyo waxa u dhexeeya oo dhan abuuray , ilaahayaw adaa buuraha dhulka uga dhigay qodimada , rabbiyaw adaa badaha ku haya meelahooda oo an dhaqaajin

Yaa rabi waxan awoodada ka arkaa dhulka iyo geedaha cagaaran ee ka soobaxaya , shimbiraha duulaya hawada fog , daruuraha heegoyinka ee u dhexeeya cirka iyo dhulka ee insaanka u keena raxmada iyago quustay

Rabiyaw waxan quruxdaada ka arkaa insaanka midabada iyo luuqadaha kala duwan leh ee aad ku abuurtay arlada daafeheeda.

Ilaahaayaw quwadaada waxan ka arka sida aad ugu ilaalinayso uurjiifka caloosha hooyadi ila inta uu ka imanayo aduunyada

Rabiyaw waxad tidhi

وَفِي أَنفُسِكُمْ ۚ أَفَلَا تُبْصِرُون

Nafaihiina waxa ku sugnaaday calaamado muujinaya awooda eebe

Calaamadahaas waxan ka aragna qaabka iyo quruxda insaanka ee gaarka ah , waxan ka aragnaa sida aad bani aadma isugu dheelitirtay ee aanay ahayn kuwo kala dhaadher oo is leeg , waxan ka aragna jidhkeena , indhaheena , maqalkeena iyo nashqada gaarka ah ee anu qofna qofka kale u eekayn

Ilaahayaw waan aragna sida aad ducada nooga aqbalayso ee ad noogu naxariisanayso

Kuwan oo idil markaad eegto oo aad dib ugu fiirsato naftaada waxaad xasuusanaysa abuurahooda iyo in aanay jirin cid isaga lamida oo samayn karta sidiisa o kale .

Ilaaha intan oo dhan leh ee awooda ee kara miyaanu mudnayan in la jeclaado oo la cabudo oo laga talo qato kaligii?

Haa walaahi ban ku dhaarte wu istaahila

Rabiyaw naga dhig kuwo eeg eega oo dhugta aayadka iyo calaamayinka ku hareeraysan

Haddii aad boggan xidhayso adigoon qalbigaagu waxba dareemin, dib u akhri. Ha u akhrin sidii buug caadi ah, ee u akhri sidii qof raadinaya inuu garto Rabbigiisa. Waxaa laga yaabaa in boggani noqdo bilowga isbeddelka ugu weyn ee noloshaada.

Cuttubka 2’aad

Mucjisnimada Qur’aanka Kariimka ah

Wixii ugu horeeyay ee isoo jiita wuxu aha nucjisnimada quraanka iyo sida uu uga duwan yahay

kitab kaste wan ogaa in quraanka kariimki yahay hadalka Eebbe (SWT) lkn maan dareensanayn mucjisnimadiisa haday noqoto mucjisnimada hadalka iyo luuqada , iska daba dhaca iyo siday isugu xidhanyihiin aayadaha,suuradaha iyo juzasku ,mucjisnimada khilaaf la,aanta iyo in aanay jirin waxa iska hor imaanaya ,wararka umadihii hore iyo kuwo iman doona mucjisnimada cilmiga sharciga iyo axkaamta ,

Waa mucjiso joogto ah oo aan ku koobnayn waqti ama dad gaar ah, kana duwan mucjisooyinkii nebiyadii hore oo ku ekaa waqti iyo dad kooban

Mucjisnimada Afka iyo Qaabka Hadalka

Carabtii joogtay waqtigii Qur’aanka lagu soo dejiyey Nebiga ﷺ waxay ahaayeen dad ku caan baxay aftahannimo, gabay iyo suugaan. Si kastaba

ha ahaatee, Qur’aanku wuxuu la yimid hadal ka sarreeya oo ka xeeldheer wixii ay garanayeen. Qaabka aayadaha, isku xirnaanta macnaha, iska daba dhaca suuradaha , iyo quruxda hadalka ayaa ah kuwo aan la la tartami karin, kuna noqday wax mucjiso ah dad ki joogay xiligaas

Diin laawayaashi carbeed iyago garanaya quraanka xaq nimadiisa iyo rasuulka amaanadiisa ayay hadana iska indho tireen oo ay dheheen muxamed wuu abuurtay quraaanka marakaas ayaa

Alleh (swt) marki kobaad wuxu ku xujeeyay dadki wakhtiga joogay in ay keenan wax udhigma ama lamida quraanka ka riimka

﴿قُل لَّئِنِ اجْتَمَعَتِ الْإِنسُ وَالْجِنُّ عَلَىٰ أَن يَأْتُوا بِمِثْلِ هَٰذَا الْقُرْآنِ لَا يَأْتُونَ بِمِثْلِهِ وَلَوْ كَانَ بَعْضُهُمْ لِبَعْضٍ ظَهِيرًا﴾

Waxaad tidhaahda nebi allw hadi jinka iyo insigu isku tagaan si ay u keenan quraanka mid lamida weligood keeni maayan mid la mid ah ,haba ahaaden kuwo badhkood badhka kale taagerayo

Suuradda Al-Israa (17:88)

Way awoodi waayeen wayna ku guuldaraysteen inay furaan oo keenann xujadaas.wax leeg ama ku soo dhaw

2. mar labaad ayu alleh (swt) xujeeyay Diin laawayaashi xujo ti hore ka fudud alleh wuxu ku idhi

﴿أَمْ يَقُولُونَ افْتَرَاهُ ۖ قُلْ فَأْتُوا بِعَشْرِ سُوَرٍ مِّثْلِهِ مُفْتَرَيَاتٍ﴾

Suuradda Huud: 13

Waxay odhanayaan nebigu wuu abuurtay quraanka , keena bu alleh leeyahay Toban suuradoo oo lamid ah quraanka o aad abuurateen

Way ku fashil meen xujaadaasna oo way keeni waayen Tobban suuradood oo udhigma Quraanka

Hadana mar sadeexaad aya la xujeeyay mid kuwii hore ka sii fudu kana sahlan wuxuna ku idhi alleh

﴿وَإِن كُنتُمْ فِي رَيْبٍ مِّمَّا نَزَّلْنَا عَلَىٰ عَبْدِنَا فَأْتُوا بِسُورَةٍ مِّن مِّثْلِهِ

Suuradda Al-Baqarah: 23

Hadi aad tihiin kuwo ka shakisan waxan adoon kayaga ku so dejinay oo waxyi ah bal keena hal suurad oo quranka la mid

Suurada quraanka ugu yari waa ina acdayn , {alkawthar} wxa ay ka koobantahay sadar iyo badh wa sadex aayad oo kaliya , waxay ka kooban tahay tobban jumladood aayadkasta waxay ka kooban tahay tobban xaraf

xarafka uguso ر) wuxu so noqday toban jeer, waxa xarafka noqnoqodka badani waa (

Raa ku dhamaada tobban suuradood suratu Kawthar wa ta u danbaysa

Marka ay suuradi ugu yarayd waxn oo icjaasnimo ah leedhay maxad u malayn kuwa ka dhaadheerna

Tani waxay inoo caddeyneysaa in Qur'aanku yahay mucjiso ilaahiya oo aan bini'aadam samayn karin.

Mucjisnimada axkaamta ayaadaha

Axkaamtu quraanku waa amarro iyo reebitaanno Alle ku dejiyey Qur'aanka si uu u hago nolosha bini'aadamka. Waxa kamida kuwan,

Axkaam Cibaado

sida Salaadda, soonka, zakada, xajka – kuwaas oo xoojiya xiriirka addoonka iyo Alleh u dhexeeya \

Kuwani waa xeerar iyo sharci rabi inoo dejiyay waxa aynu aad uga dheregsenahay fadligooda iyo abaalka loo diyaariyay qofka Sameeya waxay farayaan sharciyadani

Waxaynu ogsoonahay in salaada iyo soonku ay yihiin cibaado laga fulinayo jidhka misna lagu daahirinayo qofka , halka sadaqada iyo xajkuna ay yihiin cibaado maaliya oo lagabixinayo hantida qofka muslimka ah kuwani wa habki rabi loola xidhiidhayay laguna adeecayay

Axkaam Mucaamalaad

hadaynu so aragnay sidi aynu alleh ula xidhiidhi lahayn tanina wa sidii aynu ula dhaqmi lahayn dadyawga iyo deeganka inagu hareeraysan

alleh swt waxa uu ina baray sidaynu ula mucaamaloon lahayn dadka inagu xeeran , sida uu waalidku ula dhaqmi laha ilmihiisa , iyo sida uu ubadku ugu samo falilaha waalidka

labada nolosha ku midooba siday u wada noolaan lahaayeen , iyo sida aynu ula dhaqmi lahayn noolayaasha kale ee an bani aadaka ahayn sida dhirta , xoolaha , iyo xayawaanad kale ee inagu hareeraysan

alleh wuxuu ina barayaa sida ugu fiican ee aynu u wada noolaan lahayn haday noqoto ixtiraam, runsheegid ,dulqaad,iyo is cafin

Mucjisnimadisu waxay na tusaysa in uu ka imid ilaah xikmad badan , xikmadiisas o dhisaysa bulshada qaybeheeda kala duwan

Mucjisnimadisu wa ta aan kala saarayn dadka mid wayn iyo mid yar , mid sabool ah iyo mid Hodan ah ,Mid madax ah iyo mid caamo ahba.

Waa axkaam ay u siman yihiin qaybaha kala duwan ee bulshada wana dastuur ilaahiya oo dhamaystiran

« bal tusaalahan quruxda badan ila eeg ,waxa jirtay xiligii rasuulka NNKH in gabadh wax xaday lgu fulinayay xadki denbigi ay gashay , dadki ba ku idhi Nebiga NNKH ,waa gabadh ka soo jeeda reero sharafleh ee kada ha goynin gacante ,

Nebigu scw wuxu idhi ilaah ban ku dhaartaye hadi faadumo gabadhi rasuulka ay wax xadi lahayd waan ka goyn lahaa.

Halka waxa si cad inogu muuqda cadaalada ay diintenu ina farayso iyo sida cajiibka ah ee ann qofna lo dulmiyin.

Waxa iga yaabiyay sidu quraanku mucjis u noqday, waxa laga yaaba in uu hal aayad alleh kaga waramo axkaam farabadan, sida

Digniin , bushaaro, wanaag faris , xumo reebid iyo jano ama cadaab

Waxa cajiiba axkaamta kitaabku sida ay u dhisayso bulshada islaamka iyo cid walo raacda iyado aanay jirin wax u dhigma kitaabka alleh.

Mucjisnimada iyo cilmiga casriga

Qur’aanku wuxuu xusay arrimo cilmiyeed oo la xaqiijiyey qarniyo badan kadib.

Waxa jira arimo cilmiyeed oo quraanku ka hadlay qarniyo badan ka hor balse hada la si xaqiijiyay marki la helay qalab casri ah , taas oo amakaag ku noqotay kuwi alleh diidka ahaa

Waxa ugu wayn ee ay hada dhaw ogaadeen uguna cajiibsan ayaa ah cilmiga uurjiifka iyo abuuritaanka aadanaha

Waa awood iyo farsamo alleh ugaar ah

Alleh swt waxa uu quraanka ku sheegay marxalado isdaba jooga oo qofka insaanka ahi maro marka uu abuurmayo .

Alleh waxa uu quraanka inoogu sheegay asalka insaanka laga abuuray in uu ahaa dhoobo ama ciid

﴿إِنِّي خَالِقٌ بَشَرًا مِّن طِين

Insaanka waxan ka abuuray dhoobo , sido kale waxa uu alleh xusay in ay dhoobadu martay marxalado kala duwan ayna martay heerar kala duwan

﴿وَلَقَدْ خَلَقْنَا الإِنسَانَ مِن صَلْصَالٍ مِّنْ حَمَإٍ مَّسْنُونٍ

Dhabnimo insaanki waxan ka abuurnay dhoobo qoyan , kedib waxay noqotay dhoobo qallalan oo dhawaq samaynaysa , ugu danbayn waxy noqotay dhoobo madaw ur leh

Hadaba waxa cilmigan casriga ah lagu ogaaday in jidhka insaanku ka kooban yahay curiyayaal laga helo dhulka, sida, kaalshiyam , iron,botaashiyam iyo kuwo kale oo badan

Taas macnehedu maaha in aqoon cusub la gaadhay balse wa in hada ay xaqiiqsadeen wararka mucjisada ah ee alleh inoo sheegag 14 qarni ka hor , waajibna ay tahay in qofka muslimka ahi uu aamino waxa uu alleh usheegayo.

Dhoobada kadib waxa alleh inoo sheegay , in uu inaga abuuray biyo aad u yar oo ka imanaya shawhwada laba qof oo lab iyo dhedig ah

أَلَمْ نَخْلُقكُّم مِّن مَّاءٍ مَّهِينٍ

Miyaanan idinka abuurin biyo yar oo liita .

Aayadahan waxay tilmaamaysa in alleh ka abuuray insaanka dhibic shahwo ah oo hada cilmiga casriga ahi ogaady in ay ka kooban tahay malaayin unugyo yaryar oo is biirsaday ah.

﴿ثُمَّ خَلَقْنَا النُّطْفَةَ عَلَقَةً فَخَلَقْنَا الْعَلَقَةَ مُضْغَةً

﴿فَخَلَقْنَا الْمُضْغَةَ عِظَامًا فَكَسَوْنَا الْعِظَامَ لَحْمًا\

Alleh waxa uu si wada sida uu isugu xigay abuurka insaanku , waxa biyaha ku xigay xinjir, waxay isu bedeshay waslad hilib ah , hadana wasladi aya la si saaray lafo , waxa lagu si huwiyay lafihii hilib , sidaas ayuu ku dhamays tirmay insaanki wuxuuna noqday bashar dhamaystiran . Subbxaanallah ilaahayba xumo ka nasahan sidan no abuuray

U fiirso waxyar sida quruxda badan ee alleh u sharxayo bilawgi insaanka iyo marxaladaha u so maray , bal naftaada uun eeg iyo qaabka wanaagsan ee alleh kuu abuuray.

Oo waxaad xasuusata in ay jirtay xili anu bani aadamku waxba ahayn

هل أتى على ألأنسان حين من الدهر لم يكن شيئا مذكوراً

Hadana alleh wuxu xusay isagoo karaamo leh oo ka fadli badan jinka iyo xoolaha kale oo dhanba

ولقد كرمنا بنى ادم

Mucjisada kawayni maxay tahay in insaanki laga keenay waxba ilaa heer la karaameyay

Waa arin u baahan in alleh loogu mahadiyo marwalba.

Cuttubka 3’aad

Dembidhaafka (tawbada)

Cutubkani wuxuu ka hadli doona fadliga ay leedahay inaad ilaahay dhembi dhaaf waydiisataa. Oo laad u soo noqdo isaga.

Alleh waa **At- Twaab**, waa mid ka mida sifaat ka rabbi , waa ka aqbala insaanka u soo laabta .

Tawbadu waa in uu qofku qirto qaladkiisa iyo gefka uu alleh ka galay, isagaoo la imaanaya daacad iyo soo noqosho run ah.

Waxaynu u abuuranahay in aynu gefno lkn waxa ladiiday in qofku sii dhex muquunto oo ku sii dhexjiro denbiyada uu gelayo.

Aabeheen aadam oo aynu ka farcanahay waxa uu ku dhacay qalad , lkn markiiba waa u ka soo laabtay gefkii u galay , rabina wuu ka aqbalay

﴿فَعَصَىٰ آدَمُ رَبَّهُ فَغَوَىٰ ۝ ثُمَّ اجْتَبَاهُ رَبُّهُ فَتَابَ عَلَيْهِ وَهَدَىٰ

Aadam cs wuu caasiyay rabigii wuuna anbaday, kadib rabigii ayaa doortay wuuka taoobad aqbalay. Wuuna hadeeyay

Hadaba inaku maadama aynu nahay dhashii aadam , waxa aynu u gefna si kabadan sidi aabehn aadam oo kale , sida darteed inaka ayaa aad ugu baahan in aynu toobad keeno oo u soo laabano rabigeen.

faaidada aay leedahay iyo midhaha aad ka helayso

Dhembi Dhaafka waa inaad ka tobaad keenta dembi kaste oo kaadhaca ha ahaato mid yar iyo mid weyn aadna ogaato inaad leedahay Rabbi Kaa dhaafaya Dembi kasto aad ka gashay Alle

Wuxu rabi balan qaaday in uu cafinayo qof walbo toobad keena

Suurat An-Nisaa' 4:110

وَمَن يَعْمَلْ سُوءًا أَوْ يَظْلِمْ نَفْسَهُ ثُمَّ يَسْتَغْفِرِ اللَّهَ يَجِدِ اللَّهَ غَفُورًا رَّحِيمًا

"Qofkii xumaan sameeya ama naftiisa dulmiya, dabadeed Alle dambi dhaaf weydiista, wuxuu heli doonaa Alle oo Dambi-Dhaaf Badan, Naxariis Badan."

Alle Waxa uu Adoomahan u abuuray inay keligii caabudaan oo aanay cid kale lawadaajinin sidaas oo ay tahay hadana shaydaan oo ah kan inagu lifaaqan ayaa ballan qaaday inuu lumin doono adoomaha intooda badan , iyadoo sidaasi jirto haddana haduu adoonku Alle u soo laabto isago Alle u toobad keenaya oo dembi dhaaf waydiisanaya wuu ka aqbalayaa .rabbi tawbada

Qofka Mumunka Ahi waa qofka Alle subxaanahu Watacalla Dembi Dhaaf waydiista Qalbigiisa iyo Arimihiisana isaga uun ku xidha .Alle Markuu Sifaynayey Dadka Muminta wuxu Yidhi .

﴿وَبِالْأَسْحَارِ هُمْ يَسْتَغْفِرُونَ﴾

Macnaha:(Waa kuwa Dembi Dhaafka Waydiista Xiliyada Saxarka).

Waxaan bartay intaa ku jirey safarkayga Tafsiirka wax walba oo aan doonayo aduun iyo aakhiraba inay iga xigto uun Dembi Dhaaf , Haday tahay Arsaqad, Awlaad ,nolol Qurux Badan , waxaanan ka faaidey Qisadii Nebi Nuux iyo Qoombkiisa Dhex martay taas oo uu kulaha hadaad maal ,awlaad Arsaaqad Doonaysaan Alle dembi Dhaaf waydiista .

Alle wuxuu ku yidhi Hadalkiisa :

Aayaddu waxay ku jirtaa Qur’an, aayadaha 10–12.

فَقُلْتُ اسْتَغْفِرُوا رَبَّكُمْ إِنَّهُ كَانَ غَفَّارًا ﴿١٠﴾

Waxaan ku idhi: ‘Rabbigiinna dambi-dhaaf weydiista, waayo Isagu waa Dambi-Dhaaf Badane.’

يُرْسِلِ السَّمَاءَ عَلَيْكُم مِّدْرَارًا ﴿١١﴾

‘Wuxuu idiin soo dejin doonaa roob badan oo joogto ah.’

وَيُمْدِدْكُم بِأَمْوَالٍ وَبَنِينَ وَيَجْعَل لَّكُمْ جَنَّاتٍ وَيَجْعَل لَّكُمْ أَنْهَارًا ﴿١٢﴾

‘Wuxuuna idiinku kordhin doonaa xoolo iyo carruur, wuxuuna idiin yeeli doonaa beero iyo webiyo.’.

Axadiista NeBIGA KUsoo Aroortay Fadliga Dhembi Dhaafka.

Nebiga Naxariis iyo Nabad gelyo dushiisa ahaatee wuxuu ahaa mid Alle dembi dhaaf waydista isagoo laga dhaafay dembigiisi hore iyo kiisi dambeba hadana ismuu dhigan jirin .

Nabigu ﷺ wuxuu istiqfaar samayn jiray maalin kasta

Waxaa laga weriyey Abu Hurayrah in Nabigu ﷺ yiri: « وَاللهِ إِنِّي لَأَسْتَغْفِرُ اللَّهَ وَأَتُوبُ إِلَيْهِ فِي الْيَوْمِ أَكْثَرَ مِنْ سَبْعِينَ مَرَّةً-». Wallahi, waxaan Alle dambi dhaaf weydiistaa oo u towbad keenaa maalin kasta in ka badan toddobaatan jeer."

Nebigii Alle soo diray baa sidaas Alle dembi Dhaaf u waydiisanayee adna maxaad isu mayn oo dhac dhacaagu badan yahayb.

Xadiis kale wuxuu Nebiga Waxaa laga weriyey Al-Agharr al-Muzani in Nabigu ﷺ yiri:

»يَا أَيُّهَا النَّاسُ تُوبُوا إِلَى اللَّهِ، فَإِنِّي أَتُوبُ إِلَيْهِ فِي الْيَوْمِ مِائَةَ مَرَّةٍ«

"Dadow, Alle u towbad keena; aniguna waxaan Alle u towbad keenaa boqol jeer maalintii"

Istiqfaarku wuxuu keenaa faraj iyo meelaad uga baxdo dhibaatokasto ku haysata haday Naftaada , ehelka tahay iyo Bulshada tahayba.

Waxaa laga weriyey Abdullah ibn Abbas in Nabigu ﷺ yiri:
»مَنْ لَزِمَ الِاسْتِغْفَارَ جَعَلَ اللَّهُ لَهُ مِنْ كُلِّ هَمٍّ فَرَجًا، وَمِنْ كُلِّ ضِيقٍ مَخْرَجًا، وَرَزَقَهُ مِنْ حَيْثُ لَا يَحْتَسِبُ«

Qofkii joogteeya istiqfaarka, Alle wuxuu uga yeelaa murugo kasta furfurnaan, cidhiidhi kasta meel uu ka baxo, wuxuuna ka arsaaqaa meel uusan filayn.”

Run ahaanti xadiiskan markaan maqlo ama niyada igaga so dhaco waxan dareema kalaooni buuxda oo aan rabigay ku qabo.

عن أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه، عَنِ النَّبِيِّ ﷺ، فِيمَا يَرْوِي عَنْ رَبِّهِ عَزَّ وَجَلَّ، قَالَ:

“أَنَا عِنْدَ ظَنِّ عَبْدِي بِي، وَأَنَا مَعَهُ إِذَا ذَكَرَنِي، فَإِنْ ذَكَرَنِي فِي نَفْسِهِ ذَكَرْتُهُ فِي نَفْسِي، وَإِنْ ذَكَرَنِي فِي مَلَإٍ ذَكَرْتُهُ فِي مَلَإٍ خَيْرٍ مِنْهُمْ، وَإِنْ تَقَرَّبَ إِلَيَّ شِبْرًا تَقَرَّبْتُ إِلَيْهِ ذِرَاعًا، وَإِنْ تَقَرَّبَ إِلَيَّ ذِرَاعًا تَقَرَّبْتُ إِلَيْهِ بَاعًا، وَإِنْ أَتَانِي يَمْشِي أَتَيْتُهُ هَرْوَلَةً

Abii hurayra , waxa uu ka so wareiyay rasuulka scw xadiis qudsigan

Alleh wuxu idhi,

Anigu waxaan ahay wuxu adoonkaygu iga fisho, Waxaan la jiraa marka uu i xusayo.hadii uu naftiisa (gaar ahaantiisa) ii xuso ana naftayda ayaan ku xusaa , Haduu koox ama jamac dad ah igu xuso , waxaan ku xusaa jamac ka khayr badan oo malaa’igta ah .hadii uu isoo dhawaado

hal taako waxaan u soo dhawaada hal dhidhun, hadii uu dhudhun ii soo dhawaado waxaan u soo dhawaada baac,

Haduu ii imaado isago lugaynaya waxaan u tagaa anigoo guclaynaya.

Ka waran alleh ku xusaya markaad xusto, alleh ku so degdegaya , markaad xagiisa u socoto .waxay ingu dhiiri galinaysaa arin kani in aynu rabi marwalb u laabano.

Cuttubka 4’aad

Jacaylka rabbi ayaan bartay

Hadaynu nidhaahno waxaynu ka sheekaynaynaa jacaylka rabi , ma soo koobi karno dhadhankiisa iyo macaanka uu leeyahay

Dareemada qofka bini aadmka rabigii kala dhexeeya way badan yihiin , haday noqoto rajo, cabsi , talo saarasho iyo kalsooni lkn dareenka ugu wanaagsan ugu qurxda badan uguna sareeya aya ah darenka jacaylka rabbi.inaad rabi jeclaato

Lakin waxa hubantiya in dadko dhami ay rabi jecelyihiin , su’aashu waxay tahay si iskumid ah miya u jecel yihiin dadku Eebe?

Waxa laga yaaba jacaylka laba qof ay rabi jecel yihiin uu ukala fogaadan sida cirka iyo dhulka oo kale

Hadaba hadii aad rabti inaad dareento jacaylka rabi swt kaliya naftaada waydii hal su,aal

Maxaan allah u jecelahay?

Waxa hubantiya marka aynu qof jeclaanayno waxan ku doorana sadexdaan sifo oo kaliya

Kaw inaad qurux ku jeclaatay , oo waxa caadiya qofka insanki inu wax jeclaado qurux darteed . laba qofkaasi inuu si wanaagsan kuula dhaqmo ,oo cilaaqo wanaagsan idinka dhaxayso ood kujeceshahay dhaqankiisa wanagsan . ta sadexad oo ah in uu qofkaasi abaal kuugalay oo aad u jeclaatay kaliya maalin uu ku taageeray adigoo ubaahna

Hadaba dhamaan sadexdaan sifo waxa koobsaday allah jalajalaal,

Alleh waxaynu ku jecelnahay wanaagiisa , dheeradka uu ino galo iyo sido kale quruxdiisa hadaba ilaaha aynu caabudayna wuu qurux badanyahay wuxuuna ka qurux badan yahay wax kaste oo dunida saaran.

Allehna qalbiyada insaanka wuxu ku abuuray inay jeclaadan waxkaste oo qurux badan ,waxay jecel yihiin qofka akhlaaqda wanaagsan , waxay jecel yihiin wajiyada qurxoon , waxay jeclyhiin dabeecada qurxoon

Qurux kaste oo ay arkaan way jeclaa nayaan ,hadaba markaad barato quruxda rabi waxa hubantiya inaad jeclaanayso , waan ogahay ina allah swt aad jeceshahay lkn waxa kuu si kordhaya jacaylkiisa , hadaba quruda alleh wa arin anu garanayn cid alleh ka sokaysa ,inaad quruxdiisa jeclaato wa jacaylka ugu wanaagsan , sida darteed alleh wuxu naftiisa ku magacaabay (الجَمِيل) wax ka qurux badni ma jirto inaad quruxdiisa ku jeclaato waayo

اللَّهَ جَمِيلٌ يُحِبُّ الْجَمَالَ alleh wa qurux badan yahay wuuna jecel yahay quruxda , nimacad ugu wayn ee qofku hela wa argtida wajiga qurxda badan ee ilaahay , xaalada ugu wanaagsan uguna macan ee insaanku la kulmo marku janada galo, alleh haynaga mid dhigo kuwo arka wejigisa qurxoon.

Sababta labaad ee aynu ku jeclaanayna wa sida wanaagsan ee uu inoola dhaqmo.

Ma cid ka wanaag badan ayaa jirta sida uu alleh inoo la dhaqmo, jawaabtu waa maya

wu ina quudiya ina ilaaliya , ina siiya wax walba oo aynu waydiisano, waynu ku gafnaa hadh iyo habeenba , hadana sidaas oo ay tahay inama ciqaabo ee bedelkeeda wuxuu idhaahda habeen kaste , adoomahaygiiyaw yaan udanbi dhaafa oo yaan waxsiiyaa

kawaran hadaba ilaaha aynu caasiyayno hadh iyo habeen , si muuqata iyo si qarsoonba ayaa ianagu leh hadana ii kaalaya waan idin cafinayaaye

ilaahbaan kugu dhaariye ilaahasi miyaanu u qalmin in la jeclaado oo la adeeco

hadaba iska eeg hal sifo oo aad ku ogaan karto in aad ka mid tahay dadka uu alleh jecel yahay

alleh wuxu quraanka ku leeyahay

قُلْ إِن كُنتُمْ تُحِبُّونَ اللَّـهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّـهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ ۗ وَاللَّـهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ

Waxaaad ku tidhaah rasuulki allaw Hadii aad ilaahay jeceshihiin aniga iraaca alleh ayaa idin jeclaanaye denbigiinana wu dhaafaya allehna wa mid denbi dhaaf badan oo naxariis badane.

Ka sheeganaya in uu alleh jecel yahay ee hadana aan raacayn rasuulkiisa waa beenaale alleh ka fogaaday , hadaba si aad u hesho maxabada ilaahay raac dariiqi rasuuliisa NNKH

Ka kaleexda dariiqaasna wuxu ku noolaanaya nolol cidhiidhi ah madaama uu alleh ka fog yahay

Waxaynu ogsoonahay xanuunka iyo ciqaabta ugu daran qofka waxa jecel in ay tahay marku waayo ciduu jeclaa , qofku hadu waayyo qof uu jecla wuxu raad sanaya qof u buuxiyay booskii uu kabaxay qofkasi siu u naftiisa uga yareeyo culayska ,lkn side weye markaad alleh ka tagto ee isaguna bedel qaato cid isaga jecel iyado cid alleh la maasal ahi jirin

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا مَن يَرْتَدَّ مِنكُمْ عَن دِينِهِ فَسَوْفَ يَأْتِي اللَّهُ بِقَوْمٍ يُحِبُّهُمْ وَيُحِبُّونَهُ

Dadki imaanka laga helayaw hadi mid idinka mid ahi ka noqdo diintisa alleh wuxuu keenayaa dad jecel isaga allehna uu jecel yahay

Kani waa balan qaadka alleh qofka isaga ka taga in uu allehna ka tagayo uu weliba keenayo dad isagu jecel yahay iyaguna jecel

Balan qaad Kalena alleh wu u yaboohay dadkaas isaga ka fogaaday in uu noolaanayo nolol taan ugu adag shaydaana la raacin doono saaxibna uu u noqon doono

وَمَن يَعْشُ عَن ذِكْرِ الرَّحْمَٰنِ نُقَيِّضْ لَهُ شَيْطَانًا فَهُوَ لَهُ قَرِينٌ

Taa cagsigeeda hadii aad alleh rumayso camal wanaaagsana la timaado waxaad noolaan doonya nolo tan ugu wanaagsan aduun iyo akhiroba

مَنْ عَمِلَ صَالِحًا مِّن ذَكَرٍ أَوْ أُنثَىٰ وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَنُحْيِيَنَّهُ حَيَاةً طَيِّبَةً ۖ وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَجْرَهُم بِأَحْسَنِ مَا كَانُوا يَعْمَلُو

Sababta sadexaad oo ah inuu dheeraad iyo fadli inagu leeyahay

Waa maxay fadliga ilaahay inagu leeyahay?

Fadliga ugu wayn ee alleh swt ina siiyay wa inuu inaga dhigay bani aadam caqli leh oo karaamaysan , hadana inaga dhigay dad muslim ah oo u ku galaday diintan

Hadii uu qof maalin adigoo u baahan uu wax yar oo lacag ah ku siiyo waxa laga yaaba inaad jeclaatid oo marwalba aad sheegshegid,

Bal ka waran allah ku siiyay garadka aad wax ku kala garanayso ee aan kaa dhigin mid waalan , ka warana allaha ku quudiyo habeen iyo dhareer adigoon waydiisan , ka waran allaha kuu sameeyay quruxda iyo qaab ka gaar ka adiga kuu ah , ka waran ilaaha ku ilaalinaya habeen iyo dharaar ee aan hadana lacag iyo abaal kaa doonayn .

Iisheeg bal cid ku siin karta fadligan iyo dheeraad kan o kale ?

ذَٰلِكَ فَضْلُ اللَّهِ يُؤْتِيهِ مَن يَشَاءُ ۚ وَاللَّهُ ذُو الْفَضْلِ الْعَظِيمِ

Arimahas oo dhami waa dheeraad ilaahay cida uu doono ayuu siiya ilaahaybana fadligiisu wayn yahay

Hadaynu nidhaahno waxay nu koobayna ilaahay dheraadkisa iyo nimcooyinkisa ma tirin karayno

وَإِن تَعُدُّوا نِعْمَةَ اللَّهِ لَا تُحْصُوهَا

Cuttubka 5,aad

Naxariita rabi ayaan bartay

Mararka qaar qofku wuxuu ku noolaan karaa sannado badan isaga oo ku dhex jira badweyn nimcooyin ah, haddana aan si dhab ah u dareemin nimcooyinkaas . Wuxuu neefsadaa hawada, ku raaxeystaa caafimaadka, ku seexdaa nabad, wuxuuna ku toosaa subax kasta nimcooyin aan tiro lahayn, balse qalbigiisu ma dul istaago si uu u milicsado cidda nimcooyinkaas oo idil siisay.

Dad fara badan oo inaga mid ah ayaa sidaas ah , anaiguna dadkaas ayan ka mid ahaa.

Waxaan arkayay nimcooyinka Alle, laakiin ma aanan arag xeel dheerida naxariistiisa. Waxaan aqaanay in Alle yahay Ar-Raxmaan iyo Ar-Raxiim, balse ma aanan dareemin sida magacyadaas ay noloshayda uga muuqdeen maalin kasta. Waxaan ku socday jidka nolosha aniga oo mararka qaar hilmaamaya in tallaabo kasta oo aan qaadayo ay ku socoto naxariis Alle.

Hadaba intaan ku gudo jiray safarkan , wax walba way is beddeleen.

Waxaan ogaaday in naxariista Alle aysan ahayn oo keliya nimcooyinka aan jeclahay. Waxay ahayd sidoo kale imtixaannadii i xanuujiyay,

ilmadii iga qubatay habeenadii aan cidina i maqlayn, albaabadii la iga xidhay, iyo riyooyinkii aan waayay. Wax kasta oo aan u arkayay dhib iyo murugo,

Immisa jeer ayuu Alle iga leexiyay wax aan jeclaa, balse uu ogaa inuu dhib ii yahay?

Immisa jeer ayaan baryay arrin, haddana aanan helin, ka dibna ogaaday in waxa la iga celinayay ay ahayd naxariis iga qarsoon?

Immisa jeer ayaan dhacay, haddana ay gacantiisa naxariistu igu soo celisay awood dheera ah ?

Markii aan dib u milicsaday noloshayda, waxaan arkay in tallaabo kasta oo aan maanta joogo ay ahayd hanuun iyo naxariis. Xitaa markaan isaga ka fogaa, isaga ima uusan dayicin. Markaan gafay, albaabka towbada igama a uusan xidhin. Markaan murugooday, rajadana igama uusan qaadin.

Taas ayaan ku gartay in jacaylka Alle ee addoonkiisu uu ka weyn yahay inta uu addoonku qiyaasi karo.

Waxaa laga yaabaa in qofku mararka qaar is yidhaahdo, oo nafta iyo shaydaanku ugu sheekeeyaan “Waxaan leeyahay dembiyo badan oo aad uculus .” Laakiin ha ilaabin in ay naxariista Alle ka weyn tahay dembiyadaada oo dhan . Waxaa laga yaabaa inuu yidhaahdo: “Waan ka daahay tawbada rabi.” Laakiin albaabka Rabbigu ma xirmo inta ruuxu uu nool yahay. Waxaa laga yaabaa inuu yidhaahdo: “Uma qalmo.” Laakiin hanuunka iyo naxariista laguma helo mudnaan qofeed ee waxaa lagu helaa fadliga Alle iyo naxariistiisa.

Maalintii aan gartay xaqiiqadan, qalbigaygu wuxuu helay degganaansho aanu hore u aqoon. Waxaan ogaaday in Rabbiga aan caabudayo uu yahay Rabbiga naxariista, cafiska, iyo hanuunka. Rabbiga aan ka baryayo dhibaatooyinkayga inu faydo ,waa isla Rabbiga ii furaya albaabada rajada marka ay dadka oo dhan iga xirmaan.

Wax kasta oo aan waayay waxay ii muujiyeen waxa aan haysto.

Wax kasta oo aan ka murugoodayna waxay i bareen qiimaha naxariista Alle.

Sidaas darteed, haddii la i weydiiyo waxa ugu weyn ee aan helay, ma odhan doono maal, magac, ama wax kale oo adduunyo ah. Waxaan odhan doonaa:

Waxaan helay naxariis aan hore u arag.

Markaan dib u milicsado noloshayda waxan arkayaa maalmo badan oo aan ka fogaaday xuska ilaahay , waayo inaad alleh xusta aya keenaysa inaad garato raxmada alleh.

Magaranayo sababta aan aayadan u fahmi waayay marhore ?

قُلْ يَا عِبَادِيَ الَّذِينَ أَسْرَفُوا عَلَىٰ أَنفُسِهِمْ لَا تَقْنَطُوا مِن رَّحْمَةِ اللَّهِ ۚ إِنَّ اللَّهَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ جَمِيعًا ۚ إِنَّهُ هُوَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ﴾

laakin maanta waxaan bartay in naxariista ilaahay aanay iga fogayn siwalbo aan u danbaabo , si walboon alleh u caasiyo iyo sikastoon u xumaadoba , waa isha qudha ee an haysto naxariista alleh

maanta kadib waxaan joojiyay waxa Quusta loo yaqaano , o waxaan dareemayaa in uu qalbigaygu helay rejadii iyo iftiinki ka maqnaa mudadada dheer.

bal eeg siduu inoogu naxariisanayo rabbi inako gafayna , bal eeg sida uu inoo ilaalinayo inakoo ka fog , bal eeg oo ufiirso naxariistiisa ilaahay ee halka naxariisa ee ay isugu naxariisanayaan hooyada iyo ilmaheeda , xayaawan kuna uu ugu naxariisanayo dhashiisa , dadkuna ay isku cafinayaan oo ay isugu naxariisanayaan

bal waxaad ila qiyaasta 99 naxariisood ee baaqiga ah ee janada laynoogu diyaariyay ,

maalinta qiyaame maaha kaliya maalin cabsi ah balse waa maalinta lawada dhursugayo naxariista ilaahay, maalinta ay kaa carari doonto hooyadi naxariista badnayd ee kuugu jeclayd adunka ,oo marka aad hal habeen xanuusato laga yaabo in aanay seexan jirin , ay maalin kaas ay kaa firdhan doonto , aabihii ku kalihi jiray si uu u keeno qudkaaga isna kaa carari doono , walaalaha , lamaanahaagi iyo ubadkaagiba aad jeclaanayso inay denbigaaga qaadan

maalin taas ay dadku ay taagan yihiin iyago leh **RABIYOW,** ayuu alleh swt keenayaa naxariistiisa markaasu cida uu doono rabi naxariistiisa janada ku gaynaya

rabiyaw naga dhig kuwa aad maalinkaas gaadh siinayso **raxmadaada** ee aad janadaada galinayso

Cuttubka 6’aad

Ku kaaftoomida quranka

Waxaan gaadhay heer waxbarasho oo jaamacadeed, waxaanan bartay cilmiga caafimaadka. Waagii hore aad ayaan ugu farxi jiray marka aan maqlo in professor ama cilmi-baare caan ahi uu ogaaday xaqiiqo la xidhiidha Qur’aanka ama uu qiray mucjiso ka mid ah mucjisooyinkiisa. Waxaan u arkayay arrintaas daliil weyn oo kor u qaadaya qiimaha Qur’aanka.

Laakiin maanta fikirkeygii wuu is beddelay.

Waxaan ogaaday in Qur’aanku aanu u baahnayn markhaati ka yimaadda aqoonyahan, professor ama cilmi-baare si uu run u noqdo. Qur’aanku waa hadalkii Alle ee xaqa ahaa ka hor intaanay dadku ogaan xaqiiqooyinka ku jira, xaq ayuu ahaan doona xitaa haddii aanay dadku waligood ogaan xaqnimadiisa.

Markii aan sii dhex galay barashada Qur’aanka iyo tafsiirkiisa, waxaan garowsaday in qiimaha Qur’aanku aanu ku xidhnayn waxa ay dadku ka ogaadaan, balse uu ku xidhan yahay cidda soo dejisay. Waa hadalkii Rabbiga Caalamiinta. Haddii dhammaan dadka dunidu isku raacaan ama isku diidaan, taasi waxba kama dhimayso xaqnimadiisa.

Maanta markaan akhriyo Qur’aanka, waxa qalbigayga soo jiita ma aha oo keliya xaqiiqooyinka cilmiga ah ee ku jira, balse waxa dareen gaara ii sameeya hanuunka, naxariista, xikmadda, iyo awoodda uu u leeyahay inuu qalbiga beddelo. Waxaan ogaaday in mucjisada ugu weyn ee Qur’aanku aanay ahayn in uu ka warramay xaqiiqooyin uu sayniska dambe ogaaday, balse ay tahay inuu qalbi dhintay nooleeyo, naf jahawareersan hanuuniyo, qof murugaysan dejiyo, isla markaana addoonka gaadhsiiyo garashada Rabbigiis.

Taasi waa sababta maanta aan ugu kaaftoomay Qur’aanka laftiisa. Wuxuu ii yahay daliil igu filan, hanuun igu ilan, iyo iftiin igu filan.

Waxaa jirta waqti uu qalbigaygu meel walba ka raadinayay jawaabo. Waxaan dhegaysan jiray hadallada dadka, waxaan akhrin jiray fikradaha kala duwan, waxaan raadin jiray erayo qalbigayga dejiya, balse mar kasta waxaan dareemi jiray in wax uu wali maqan yahay . Erayo badan ayaan maqli jiray, aqoon badan ayaan arkayay, haddana qalbigeygu ma helin deggenaanshihii uu doonayay.

Markii dambe waxaan ogaaday in dhibaatadu aysan ahayn jawaabaha oo yaraaday, balse ay ahayd inaan ka fogaa meesha jawaabaha ugu saxan yaallaan.

Meeshaas waxay ahayd Qur’aanka Kariimka ah.

waxaan ogaaday in Kitaabkani uusan ahayn oo keliya kitaab la akhriyo ama lagu dhammeeyo bogag iyo . Waa kitaab lagu noolaado, lagu bogsado, laguna hago

Meeshaas waxay ahayd Qur’aanka Kariimka ah.

Waxaan arkay dad badan oo ku faanaya aqoonta maadiga ah, fikradaha cusub, iyo aragtiyaha ay bini’aadamku curiyeen. Qaar waxay ku doodayeen in farxadda laga helo hal meel, qaarna waxay ku tilmaamayeen xasilloonida waddo kale. Maalin kasta waxaa soo baxaya aragti cusub iyo hab cusub oo lagu sheegay in lagu gaadhi karo guul iyo degganaansho.

Laakiin waxaan ogaaday in hadallada dadka ay is beddelaan.

Wax maanta loo arko xaqiiqo, berri waxaa laga yaabaa in la diido.

Wax maanta lagu faano, sannado ka dib waxaa laga yaabaa in lagu qoslo.

Wax maanta lagu kalsoon yahay, mar kale waxaa laga yaabaa in la ogaado inuu khalad ahaa.

Qur’aanku waa hadalkii Alle. Ma beddelmo, ma duugoobo, mana luminayo qiimihiisa. Qarniyo badan ayuu jiray, haddana wuxuu wali bogsiinayaa qalbiyada, toosinayaa nafaha, hagayaa dadka, una iftiiminayaa jidka xaqa.

Xaqiiqadaan biyo kama dhibcaanka ah ayaa ii horseeday inaan ku kaaftoomo Qur’aanka.

Markaan murugo dareemo, waxaan ka helaa aayado rajada igu soo celiya.

Markaan daciifo, waxaan ka helaa aayado i xoojiya.

Markaan qalad galo, waxaan ka helaa aayado ii fura albaabka towbada.

Markaan jahawareero, waxaan ka helaa aayado i tusaya jidka saxda ah.

Markaan ka fikiro mustaqbalka, waxaan ka helaa kalsooni.

Markaan ka fikiro geerida iyo aakhiro, waxaan ka helaa waano iyo diyaar-garow.

Sidaas ayaan ku ogaaday in Qur’aanku yahay saaxiibka aan marna iga tagayn.

Waxaan bartay in qofka ku xidhan Qur’aanka aanu faqri ka dareemayn qalbigiisa. Xitaa haddii uu waayo wax badan oo adduunka ah, wuxuu haystaa hanti ka weyn. Wax walba

Markii aan kaaftoomay Qur’aanka, ma aanan joojin ixtiraamka aqoonta kale ee faa’iidada leh. Balse waxaan ogaaday in wax kasta oo kale ay yihiin kuwo labaad, halka Qur’aanku yahay meesha ugu horraysa ee aan u laabto. Haddii aan jawaab raadinayo, halkaas ayaan ka bilaabaa. Haddii aan hanuun doonayo, halkaas ayaan ka bilaabaa. Haddii aan qalbi deggan doonayo, halkaas ayaan ka bilaabaa.

Hadda haddii la i waydiiyo waxa ugu weyn ee aan ka bartay safarkayga, waxaan odhan lahaa

Qur’aanku wuxuu i baray cidda aan ahay.

Wuxuu i baray sababta la ii abuuray.

Wuxuu i baray halka aan ka imid iyo halka aan ku socdo.

Wuxuu i baray qiimaha samirka.

Wuxuu i baray qiimaha tawakkulka.

Wuxuu i baray qiimaha rajada.

Wuxuu i baray in adduunku yahay marin, aakhirana tahay hoyga dhabta ah

Sidaas darteed ayaan ugu kaaftoomay Qur’aanka. Mar kasta oo aan u laabto, waxaan ka helaa wax qalbigayga dhisa, naftaydana hagaajiya. Waxaana ogaaday in qofkii haysta Qur’aanka, uu haysto khasnadda ugu qaalisan ee adduunka iyo aakhiraba.

Qur’aankuna wuxuu ii noqday hanti aan dhammaanayn, iftiin aan damayn, iyo naxariis aan mar kasta qalbigayga dib ugu soo celisa rejeda

Aayaadki saamaynta igu yeeshay

Qaybtan waxaan ku soo koobi doona qaar ka mida aayadihii saamaynta igu yeeshay iyo waxaan ka bartay

﴿ وَاصْبِرْ نَفْسَكَ مَعَ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُم بِالْغَدَاةِ وَالْعَشِيِّ يُرِيدُونَ وَجْهَهُ ۖ وَلَا تَعْدُ عَيْنَاكَ عَنْهُمْ تُرِيدُ زِينَةَ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا ۖ وَلَا تُطِعْ مَنْ أَغْفَلْنَا قَلْبَهُ عَن ذِكْرِنَا وَاتَّبَعَ هَوَاهُ وَكَانَ أَمْرُهُ فُرُطًا ﴾

Naftaadana ku adkee la joogidda kuwa barya Rabbigood aroor iyo galabba, iyagoo doonaya Wajigiisa (raalli ahaanshihiisa). Hana ka jeesan iyaga adigoo doonaya quruxda nolosha adduunka. Hana adeecin qofka aan qalbigiisa ka mashquulinnay xuskeenna, ee raacay hawadiisa, arrinkiisuna uu noqday mid xad-dhaaf ah.”

(Suuratul Kahf)

Ayaadan saamayn gooniya ayay igu yelatay waayo waxa jiray marar fara badan oo ay iso wajeheen culaysyo badan oo keenaya in aan ka hadho barashada tafsiirka , maalin anigo aad u wareer san ayay iga so hor baxday iyadoo aad moodo in aanan aayadan hore u arag waxaad mooda in alleh sigaara igula hadlayo , intaa kadib waxaan go’aan saday

in aanan ka hadhin safarkan ilaa inta uu ka dhamaanayo Alxm maanta waan arka saamaynti aayadaas.

فَمَا ظَنُّكُم بِرَبِّ الْعَالَمِينَ

📖 الصافات: 87

Maxaad ka malaynasaa Rabbiga caalamka?

Hadii aan idhaahdo waxan ka hadlaya sida uu ahaa malaha iyo filashada rabi aan ka haystay waxa ii soo baxaysa waxyaalo aad u foolxun oo aanay haboonayn in laga hadlo , waayo ma malyn jirin in waxa igu dhacaya in uu yahay doorasho ilaah iyo imtixaan waxan dhihi jiray markay igu dhacaan wax aanay naftu jeclaysan waayo rabi adiga sidan kuugu qoray ? Waxaan alleh ka haystay inu kaliya ii abuuray in aan dhibtoonado oo murug ku jiro marwalba , lkn kaasi wuxuu ahaa male aad u liita oo shaydaanku igu waswaasinayay waxan ayaadan ka bartay in aan noqonayo ama helayo waxa aan rabigay ka fisho
Hadii aan wanaag iyo barkhad niyada gashado rabi wuu isiinaya , hadi aan xumaan iyo fikirado khaldana an ka malysto rabi in uu isiinayao aayadan ayaa iga reebtay malahi aan wanaagsanayn ee aan rabi ka haystay iguna hagtay in aan rabi ka yeesho male wanaag badan.

﴿وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ يَحُولُ بَيْنَ الْمَرْءِ وَقَلْبِهِ وَأَنَّهُ إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ

“Ogaada in Alle uu kala dhex galo oo ku kala jiro qofka iyo qalbigiisa, iyo in xaggiisa la idiin soo wada kulmin doono.”

Hadii ka ibliis la idhaahda uu awood u leeyahay in uu dhex wareego jidhkeena iyo qulqulayaasha dhiig mareenada insaanka ,in allihi ku abuuray uu kala dhex socdo qalbigaaga ha u malayn wax qariib ah oo an suurta gal ahayn.

Kala dhex galkaasi waa sifo alleh ugooniya oo inaka inaga qarsoon.

Waxa laga yaaba in aynu in fara badan qalbigeena iyo niyadeena ay ku soo xaadiraan fikrado xunxun iyo aragtiyo shaydaaniya oo hadii ay ogaan lahaayen dadka inagu xeerani dunidu ay ina nici lahaydd. Hadana isla ilbidhiqsiyo gudahooda waxa qalbigaagu uu xasuusanayaa in waxaasi ay yihiin wax alleh ka cadhaysiinaya , markiiba shaydaanka ayaad iska naaraysa waxaanad odhanaysa ilaahayaw iga cafi waxa an ku fikirayo ee awoodayda ka baxsan . Hadaba waayo cida qalbigaaga xasuusinaysa in aad ka so laabato waxaas xun? Waa alleh swt waayo isaga qalbiyadeena ku dhex wareegaya oo sifican inoi garanaya. Hadaba yay naan ku kedsoomin camaladeena oo qudha e waa in aan alleh ka barino in uu inagu sugo diintisa wanaaga badan.

﴿يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَتَّخِذُوا بِطَانَةً مِّن دُونِكُمْ لَا يَأْلُونَكُمْ خَبَالًا وَدُّوا مَا عَنِتُّمْ ۚ قَدْ بَدَتِ الْبَغْضَاءُ مِنْ أَفْوَاهِهِمْ وَمَا تُخْفِي صُدُورُهُمْ أَكْبَرُ ۚ قَدْ بَيَّنَّا لَكُمُ الْآيَاتِ ۖ إِن كُنتُمْ تَعْقِلُونَ

“Kuwa xaqa rumeeyow! Ha ka dhiganina kuwa aan idinka midka ahayn (yuhuud& nasari) kuwo sirtiinna iyo arrimihiinna gaarka ah u dhiibtaan. Kama
daalaan inay idin gaadhsiiyaan dhibaato; waxay jecel yihiin waxa idin dhibaya. Colaaddoodu afafkooda ayay ka muuqatay, waxa ay laabta ku qarsanayaanna waa ka sii weyn yahay. Waan idiin caddaynay aayadaha, haddii aad wax garanaysaan.”

Waa mid ka mida aayadka ii siyaadiya jacaylka dadka mu’miniinta iyo nacaybshaha gaalada iyo isbahaysigooda

Alleh swt wuxu inooga digayaa in aynu saxib ka yeelano kuwa gaalada ah ee isga diiday .sababta uu alleh inoogu diiday wuu inoo cadeeyay oo nacaybshiyaha ay inoo qabaan waxa uu ka soo muuqday afkooda inta laabohooda ku qarsoonina way ka sii wayntahay

Talaw dadkaygu maxay aayadan u fahmi laayihiin oo ay u dareemi laayihiin waxa uu alleh inoo sheegayo

Maxay dadkaygu uga raaliyihiin kuwa nacdasha alleh ku dhacday , oo ay xigto iyo gacal uga dhiganayaan?

Alleh swt waxa uu in fara badan inaga reebayaa u dhawaanshaha iyo la saxiib noqoshaha gaalada , waana shay inagu waajib ah

Rabbiyaw waxaan ka bari ahay waxa aad naga reebtay ee ah saxib la noqoshada gaalada kufriga cadaystay.

.Suuradda Al-Acraaf (7:176)

﴿فَاقْصُصِ الْقَصَصَ لَعَلَّهُمْ يَتَفَكَّرُونَ﴾

Waxaad uga warantaa qisaska si ay ufekeraan

Alleh swt waxa uu Nabiigisa muxamed ﷺNNKH uu faray in uu inooga qisoodo sheekeyinkii dadki inaga horeeyay si ay inoogu noqoto cibra qaadasho iyo waano

Quraanku wuxu inooga waramay qisooyin fara badan oo ay ka midyihiin qisaskii anbiyada , dedaalki ay dacwada u so mareen iyo dhibaatoyinkii ay kala kulmeen qoomamkoodi
Qisaskaasi waxa aan ka baranayna in aanay jirin dhibaato insaanka ku dhacdaa ilaa hadi ay jirto waxay ay ku dhacday nebi anbiyada
alleh kamida,
Waxa laga yaaba in aynu nidhaahno waxa inagu dhacay musiibo lkn marka aad barbardhigto mida ku dhacday nabiyada waxaad xaqiiqsanysa in ay taadu waxba tahay

Hadii aad xanuun ka cabanyso cid nabi ayuub ka xanuun badan miyaa majirto , hadii aad ilmo la’aan ka cabanayso nebi ibraahim isagoo

waynbu alleh ku arsaaqay ubada, hadii aad ehelkaaga dhibaatadooda ka cabanysid nebi muxamed NNKH adeeradi iyo reer quraysh dhibka ay u gaysteen dib u milicso
Dhinaca barwaaqada hadii la eego nabiyada uu alleh u barwaaqeeyay waxa ka mida sulaymaan iyo dauud , nimcadu alleh siiyay waxa ay ahaayen adoomo ku shukriya oo an kufriyin

Nolosha dhinac walba oo aad ka joogto waxa soo maray nabi anbiyada ka mida hadii ay noqoto badhaadhe ama balaayo . Hadaba waxa laynaga rabaa in aynu ku dayano jidkoodaas aya mareen si aynu u liibano.

سورة الانعام ايه ١٧ { ثم لاأتينهم من بين أيديهم ومن خلفهم وعن أيمانهم وعن شمائلهم ولا تجد أكثرهم شاكرين} المقصود بشاكرين

Ibliis wuxu balan qaaday in uu bani aadamka kaga iman doono xaga hor iyo xaga danbe , midig iyo bidix dadkuna ay noqon donan kuwo an shukriyin oo alleh ka fogaada

Waxa laga yaaba in aad tidhaahdo ibliis sawkan i hareereyay ee afarta jiho iiga imid lkn waxan dhihi karaa weli jiho ayaa kuu banan si aad uga badbaado waa jihada sare iyo xaga rabi swt inaga xigo , muu odhan ibliis waxan kaga iman xaga sare kaliya wuxu shegay in uu hareeraha inoga imanayo , hadab si aynu uga badbaadno dhibtiisa allehna swt ugu hogaansanaano wa in aynu xaga alleh u carar naa oo qabsana xadhiga uu alleh ino so dejiyay oo ah kitaabka iyo sunada rasuulka scw

Ayaadan markan tafsiirkeda marayay waxn dareemay in ay sigaara iso jiidanyso:
Sababtuna waxa weeyan waxan naftayda şu,aalay muxuu ibliis u doortay kalmada ah شاكرين
muxu u dhihi waayay ilaahayaw adoomahaga waxa aan ka dhigi فاسقين كاذبين كافرين،)
markan halka marayay waxa iqaaday fadul ah in aan ogaado kalmadan shaakiriin qimaheda
In badan ayuu alleh swt ku so celceliyay kalmadan mahadnaqa
Marki aan baadhay waxa ii so baxday in shukriga ama mahadnaqu sadex tiir oo aad u miihm ah leeyahay waxay kala yihiin

1, qalbiga; inaad qalbiga ka qirto nimcada alleh ku siiyay oo ad yaqiin sanaato

2, carabka; inaad carabka ku xusto alleh marwalba xamdigiisa
3, camalka ; inaad nimcada u isticmaasho waxa alleh raali kayahay

waxan is waydiiyay sidu noqon xaalaka ibliis marka aynu allah xusno xus farabadan ,ileen ilaahybu balan lagalay ah umadaada badankoda kuma mahad celinayan

Shukriga waxynu og soonahay in uu ka mid yahay mid kamida balamaha uu allah swt insaanka lagalay (hadad ishukridan wan idin ziyadin dona)
(لإن شكرتم لأزيدنكم ولإن كفرتم إن عذابي لشديد
halkan waxa aynu kala baxayna shukriga hadayno dayno in aynu gaalnimo ka dhaxlayno galnimaduna cadaab eebe ayay ino horsedaysaa

ِنَّا نَحْنُ نَزَّلْنَا الذِّكْرَ وَإِنَّا لَهُ لَحَافِظُون

“Annaga ayaa soo dejinnay Digriga (Qur’aanka), annaga ayaana hubaal ilaalinayna.”

Aayadan aniga waxay ii xaqiijisay daciifnimadayda iyo awooda rabi swt , alleh wuxu inoo sheegay in uu quraanka ilaalinayo, waxa is waydiin leh waxa uu ka ilaaliyay?

Waxa uu ka ilaaliyay in la bedelo qaabkiisa, iyo macnihiisa , in la keeno wax u dhigma ama la macno ah .

Aniga ahaan markaan go,aansaday in aan qoro buugan waxan la kulmay arin layaable, wax kale maaha ee waa buuga aan qorayo in maalinkasta aan wax ka bedelo wixii shalay ila caadiga aaha beri subax markaan dib u furo wuxuunbu ila noqdaa wax aan la qaadan Karin gebi ahaan.

Ma bug Ayaan qora mise qaladaad kayga Ayaan dib u saxaa , sida darted waxaan arkay quraanka jira in ka badan 14 qarni inuu yahay sidii lagu keenaay maalinki la soo dejiyay , maalikasta , bilkasta iyo sandkasta waxa quraanka akhriya oo dhameeya maaliyiin daafaha caalamka kala

joogta, hadana dadkaasi ma keenaan qalad yar ama sixid ay saxayaan kitaabka alleh subxanallah arin tani aniga si wayn ayay ii saamaysay

ِنَّ هَٰذَا الْقُرْآنَ يَهْدِي لِلَّتِي هِيَ أَقْوَمُ

“Runtii Qur’aankani wuxuu ku hanuuniyaa jidka ugu toosan.”

(Al-Israa: 9)

Marka aad samayso camal wanaagsan , wuxuu kuu horseedayaa jidka toosan , shaqo kasta oo wanaagsan oo aad samaysaa waxay kugu sii riixaysa wadada saxda , xumaantuna waa sida cagsigeeda , wanaagu wuxuunbu keena wanaag xumaantuna , xumaan

أَلَا بِذِكْرِ اللَّهِ تَطْمَئِنُّ الْقُلُوبُ

“Ogoaada oo baraaruga , xuska Alle ayay quluubtu ku xasishaaye.”

(Ar-Racd: 28)

Marar badan qalbiyadeena waxay la kulmaan daal iyo quus, kedib waxaynu raadina meelo aynu degenaasho ka helno , hadii aynu u leexano meel aan xuska alleh ahayn waynu guul daraysanaynaa.

Sirta degenaansha dhabta ah waa in uu qofku fahmo xuska alleh , xaalad kaste oo noloshiisa ah.

Marka ay carabka iyo qalbigu ku mashquulaan xuska alleh waxa ay nu helayna iftiin iyo degenaasho aan la cabiri Karin.

وَمَن يَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ فَهُوَ حَسْبُهُ

“Qofkii Alle talo saarta, Isagaa ku filan.”

(At-Talaaq: 3)

Wax walba iyo talaabo kasta oo aad noloshaada qaadaysid wa in aad rabi talada u daysaa isaga habayn badane isagaan la seegayn wax walba meesh ay dhacayaane

Qofka rabbi talo saarta waligii ma hungoobayo